

## Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP (Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka) Codsiga Waayeelka (Waxa loogu talagalay oo keliya shakhsiyaadka iyo lammaanaha da'doodu tahay 60 iyo wixii ka weyn)

Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka (SNAP) wuxuu ka caawiyaa dadka dakhligoodu hooseeyo oo ku nool Minnesota inay helaan cuntada ay uga baahan yihiin nafaqada wanaagsan iyo cuntada isku dheelitiran. Nacfiyada SNAP waxaa lagu bixiyaa kaarka Elektroonigga ah ee Xaawiladda Nacfiga (EBT).

### Sida foomkan loo buuxinayo

**Codsigan waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka iyo lamaanayaasha da'doodu tahay 60 jir iyo ka weyn.** Haddii ay jiraan kuwa kale oo da'doodu ka yar tahay 60 jir oo codsanaya, fadlan isticmaal "Foomka Codsiga Isku-dhafan (DHS-5223). Waxa kale oo aad ka dalban kartaa onlayn ahaan MNbenefits.mn.gov

**Buuxi oo soo celi foomkan arjiga sida ugu dhakhsaha badan.** Si arjigaagu u dhammaystirmo, ka jawaab dhammaan su'aalaha arjiga ku jira. Wareysi ayaa looga baahan yahay SNAP. Hay'adda degmadaada ama Qaranka Qabaa'ilka ayaa kula soo xiriiri doona si aad u ballansato waraysi. Ugu soo dir foomka boostada, fakiska ama gacanta ku keen xafiiska adeegyada aadanaha ee degmadaada.

**Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdi inaad bixiso caddaynta macluumaadka aad ku sheegto codsigan.**

Macluumaadka Loo Baahan Yahay
Aqoonsiga codsadhaha ama wakiilka idman (shatiga darawalnimada, aqoonsiga gobolka, baasaboora, iwm.)
Lambarada Sugnaanta Bulshada ee dhammaan dadka codsanaya caawimaadda
Dakhliga** (lacag-bixinnada, lacagta hawlgabka, iwm.) ama lacag kasta oo kale oo soo gasha qoyskaaga (shaqo la'aan, dakhliga kafaala-qaadaha, iwm.). Wakaaladu waxay xaqiijin doontaa dakhliga Lambarka Sugnaanta Bulshada.
Kharashaadka guryeynta*** (rasiidhaha kirada/guriga, rasiidhka amaahda, kiraynta, guryeynta la kabo, iwm.)
Kharashka caafimaadka*** (rijeetooyinka iyo kharashaadka caafimaadka, iwm.)

\*\* Caddaynta dakhliga 30-kii maalmood ee la soo dhaafay ama diiwaanka canshuurta dakhliga federaalka haddii aad iskaa u shaqeysato.

\*\*\* Dheeftaada SNAP way kordhi kartaa haddii aad sidoo kale keento caddaynta kharashyadan: masruufka ilmaha ee carruurta aan kula noolayn; kharashka guryaha; kharashyada caafimaadka (ay ku jiraan rajeetooyinka) ee loogu talagalay dadka naafada ah ama da'doodu tahay 60 ama ka weyn.

**Hubso inaad saxiixdo oo taariikhayso codsiga.**

## Digniinta ganaaxa SNAP

### Haddii aad hesho nacfiyada SNAP, waa inaad raacdaa sharciyadan:

- **Ha bixin macluumaad been ah** ama ha qarin macluumaad si aad u heshid ama u sii waddid helitaanka nacfiyada SNAP. Haddii aad hesho nacfiyada SNAP aadna bixiso macluumaad been ah ama qariso macluumaad ku saabsan aqoosigaaga iyo/ama degaankaaga si aad u hesho nacfiyo badan isla hal wakhti, waxaa laga yaabaa in lagaa joojiyo 10 sano.
- **Ha ka ganacsan ama iibin nacfiyada SNAP** ama kaararka helitaanka EBT. **Ka ganacsiga ama iibinta nacfiyada SNAP oo lagu qiimeeyo in ka badan \$500 waxay sababi kartaa inaad xaq u yeelan si joogto ah.**
- **Ha u isticmaalin nacfiyada SNAP inaad ku iibsato alaab aan la oggolayn**, sida khamriga iyo tubaakada.
- **Ha u isticmaalin kaarka (-arka) helitaanka EBT** ee qof kale inaad ugu hesho nacfiyada SNAP qoyskaaga.

Gobolka waxaa laga yaabaa inuu ka joojiyo xubnaha qoyska ee jabiya mid ka mid ah sharciyadan SNAP. SNAP ahaan, joojinta waxay soconaysaa hal sano been-abuurka ugu koowaad, labo sano been-abuurka labaad, wuxuuna joogto noqonayaa been-abuurka saddexaad.

Sidoo kale waa lagu maxkamadeyn karaa been-abuur, ganaaxyo-lacageed dheeraad ah iyo ciqaabo ayaana jiri kara haddii aad jebiso sharciyada. Barnaamijka SNAP, ganaaxa ugu sareeeyo ayaa ah ganaax-lacageed gaaraya \$250,000 ama xarig 20 sano ah ama labadaba.

**Digniinta ganaaxa gaarka ah ee SNAP:** Haddii maxkamada federaalka, gobolka ama degmada kugu hesho ama ku hesho qof ka mid ah qoyska dembi ah bixinta ama helida nacfiyada SNAP adigoo ku beddelanayo:

- **Maandooriye**, xubintaasi ka tirsan qoyska ayaa laga hor istaagayaa helitaanka nacfiyada SNAP 24 bilood dembiga kowaad iyo si joogto ah dembiga labaad
- **Hubka, rasaasta ama waxyaabaha qarxa**, xubintaasi ka tirsan qoyska waxaa looga hor istaagayaa helitaanka nacfiyada SNAP si joogto ah.

Haddii aad qirato dembi culus ee daroogada 10-kii sano ee la soo dhaafay, hay'adda degmada ayaa laga yaabaa inay kaa qaaddo baarista maandoriyaha safmar ah. Marka ugu horeysa ee aad ku guuldaraysato baarista maandoriyaha, hay'adda degmada waxay hoos u dhigeysaa nacfiyada SNAP ee qoyskaaga ilaa 30 boqolkiiba. Haddii aad ku guuldareysato mar labaad, si rasmi ah ayaa lagaaga saari doonaa.

**FIIRO GAAR AH:** Haddii aad saxiixdo codsigan adigoo ah wakiilka idman ee qofka codsanayo ama helayo kaalmada, waxaad oggolaanaysaa inaad dhabarka saaran doontid dhammaan mas'uuliyadaha kor ku xusan adigoo qofkaasi matalaya.

## Macluumad Muhiim ah

### Ma shardi baa in aad ka jawaabto su'aalaha aan ku weydiinayno?

Qasab maaha in aad na siiso macluumaadkaaga kuu gaarka ah. Macluumaadka la'aantiisa, waxa dhici karta in aanan ku caawimi karin. Haddii aad si kas ah nagu siiso macluumaad qalad ah, baaris iyo dambi ku oogid been-abuur ayaa lagugu samayn karaa.

## **Boggan u keydso diiwaan ahaan.**

### **Diidmada ama wax-ka-beddelka**

Gobolka ayaa laga yaabaa inuu diido ama beddelo kaalmadaada SNAP sababtoo ah macluumaadka aad ku siiso codsiga. Gobolka ayaa wax-ka-beddeli kara nacfiyada SNAP iyada oo wax ogaysiis ah 10 maalmood ka hor horay lagu siin. Gobolku wuxuu kuu soo diri doonaa ogeysiis qoraal ah ugu dambayn taariikhda aad hesho ama aad heli lahayd nacfiyadaada SNAP.

Xubnaha qoyska waxay doorbidi karaan inaysan codsan. Caddada nacfiyada SNAP waxay ku xirnaan doontaa tirada dadka codsada. Su'aalaha lambarka sugnaanta bulshada iyo jinsiyadda ama laanta socdaalka loogama baahna inay buuxiyaan kuwa aan codsan. Xubnaha qoyska ee codsada waa inay bixiyaan macluumaadkan. Xubnaha qoyska aan codsaneyn waa inay bixiyaan macluumaadka dakhligooda iyo, mararka qaarkood, raasumaalkooda waayo macluumaadkan waxaa loogu baahan yahay in lagu fiiriyo in qofka codsanayo heli karo caawin.

### **lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN)**

Barnaamijyada badankood, waa inaad bixisaa lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ee xubin kasta oo qoyska ka mid ah ee codsanaya nacfiyada.\* Haddii aad u baahantahay lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN), waan kaa caawin karnaa inaad mid codsato. Gobolka ayaa u isticmaalayo lambarkaaga Sugnaanta Bulshada (SSN):

- Si loo hubiyo aqoonsiga, ka hortaga ka qaybqaadashada labo jeer iyo si loo sameeyo isbeddel ballaaran
- Si loo hubiyo xaq u lahaanshaha barnaamijyada sida SNAP, kaalmada lacag caddaanka ah ee qoyska, iyo barnaamijka qadada dugsiga
- Si loo hubiyo xaq u lahaanshaha barnaamijyada sida SNAP, kaalmada lacag caddaanka ah ee qoyska, iyo barnaamijka qadada dugsiga
- Isuduwidada barnaamijyada kale ama hay'adaha gobolka si ay kuu siiyaan adeegyo wax ku ool ah oo waxtar leh.

### **Socdaalka**

Dhammaan macluumaadka socdaalka aad na siiso waa kuwa asturan. Waxaanu u isticmaalnaa in aan fiirino haddii aad heli kartid caawin. Waxaanu kaliya wadaagnaa marka sharcigu oggolyahay ama farayo.Inta badan, codsashada ma saamaynayso xaaladaada socdaalka.

Ma aha in aad na siiso macluumaadkaaga socdaal haddii aad:

- Kaliya ka caawinayso qof kale inuu codsado.
- U codsanayso ilmahaaga ama xubnaha kale qoyskaaga, balse aan adiga isku codsanayn.

### **Codsadayaasha muwaadiniinta ahayn**

Si aad uga hesho caawin barnaamijyada kaalmada bulshada badankooda, waa inaad si sharci ah ku joogtaa gudaha Maraykanka (U.S.). Xubnaha qoyskaaga aan muwaadiniinta ahayn oo codsanaya caawimaada waa inay bixiyaan caddaynta socdaalkooda. Sii nuqul labada dhinac ee kaararkaaga socdaalka ah ama dukumeentiyada kale ee muujinaya xaalada socdaalka ee xubin kasta ee qoyska ka tirsan oo aheyn muwaadin Amerikan ah oo codsanaya in la caawiyo. Waad u codsan kartaa waadna u heli kartaa caawin xubnaha kale qoyska, haddii xitaa aadan adiga codsaneyn ama aadan u qalmin iyadoo ugu wacan tahay xaaladaada socdaalka.

Xubanaha qoyskaaga ee aan ahayn muwaadiniinta kuwaasoo codsada oo u qalma caawin, hawlwadeenkaaga ayaa la sameyn kara xaqiijin kombuyuutareed Adeegyada Jinsiyadda io Socdaalka Mareykanka (USCIS) si loo xaqiijiyo dukumeentiyada xaalada socdaalka aad na siinayso inay yihiin sax.

Lama wadaagi doono macluumaadka kugu saabsan USCIS adiga oo aynan ogolaanshaho kaa haysan. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah ama aad jeclaan lahayd inaad ogaato waxa ay hay'addu u sheegi karto ama weydiin karto USCIS, la hadal hawlwadeenkaaga.

## **Boggan u keydso diiwaan ahaan.**

### **Rabshada qoyska iyo qaangaarka nugul**

Rabshada ama xadgudubka waa waxa qof uu dhaho ama sameeyo si uu kaaga cabsiiyo ama kuu xakameeyo. Dadka waayeelka ah, jilicsan, qaba naafonimada, ama ku tiirsan dadka kale si loo caawiyo ayaa laga yaabaa inaysan iska difaaci karin rabshada qoyska ama xadgudubka. Minnesota waxaa u degan sharci lagu difaacayo iyo lagu caawinayo qaangaarka u nugul xadgudubka ama aan awoodin inay is-daryeelaan. Sharciga wuxuu ka caawin karaa qaangaarka nugul dhawrista iyo badqabka ay u baahan yihiin.

### **Rabshada qoyska**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan rabshadaha qoyska, akhri "Buug-yaraha Macluumaadka Rabshadaha Qoyska" (DHS-3477). Haddii rabshada qoyska kugu adkayso inaad raacdo sharciyada barnaamijka, la hadal hawl-wadeenkaaga. Haddii aad khatar kaaga timaado rabshada qoyska oo aad u baahato caawimaad, wac Khadka Telefoonka Qaranka Rabshadaha Guriga 800-799-7233; 800-787-3224 (TTY) ama Isbahaysiga Minnesota ee Haweenka la Garaacay 866-223-1111.

### **Qaangaarka nugul**

Si loo soo sheego tuhun xadgudub lagula kaco qaangaar nugul ka wac Xarunta Warbixinta Xadgudubka Qaangaarka ee Minnesota 844-880-1574.

\* Ururinta xogtan, oo ay ku jirto lambarka sugnaanta bulshada (SSN) ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan, ayaa la oggol yahay sida waafaqsan Sharciga Gargaarka Cuntada ee 1977, oo la beddelay, 7 U.S.C. 2011-2036. Macluumaadka ayaa loo isticmaali doonaa go'aaminta in qoyskaagu u qalmo ama weli xaq u leeyahay ka qeybqaadashada Barnaamijka Gargaarka Cuntada. Waxaan ka xaqiijin doonaa macluumaadkan iyadoo loo marayo barnaamijyada baarista kombiyuutarka. Macluumaadkan waxaa kale oo loo isticmaali doonaa in lala socdo waafaqsanaanta qawaaniinta barnaamijka iyo maareynta barnaamijka. Macluumaadkan waxaa loo bandhigi karaa hay'adaha kale ee Federaalka iyo Gobolka ee baaritaanka rasmiga ah, iyo saraakiisha fulinta sharciga si loo qabto dadka cararaya si ay uga fogaadaan sharciga. Haddii ay soo baxdo sheegasho ka dhan ah gargaarka cuntada qoyskaaga, macluumaadka codsigan, oo ay ku jiraan dhammaan Lambarrada Sugnaanta Bulshada (SSN), waxaa loo gudbin karaa hay'adaha federaalka iyo gobolka, iyo sidoo kale sheegashada gaarka ah ee hay'adaha ururinta, ee ficilka ururinta qaansheegashada. Bixinta macluumaadka la codsadayoo ay ku jiraan lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan, waa ikhtiyaari. Si kastaba ha ahaatee, bixin la'aanta lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) waxay keeni doontaa diidmada nacfiyada gargaarka cuntada ee qof kasta oo bixin waayo lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN). SSN kasta oo la bixiyo waxaa loo isticmaali doonaa ama loo soo bandhigi doonaa sida Lambaradda Sugnaanta Bulshada (SSNs) ee xubnaha qoyska ee u qalma.



# Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP (Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka) Codsiga Waayeelka (shakhsiyaadka iyo lamaanayaasha da'doodu

tahay 60 jir iyo ka weyn)

**Sida loo buuxiyo codsigan:**

KIIS LAMBARKA

Su'aalaha ASALKA iyo JINSIYADDA waa ikhtiyaari oo ma saameynayaan u qalmashadaada ama heerka nacfiyada. Sababta aan u codsaneyno macluumaadkan waa inaan hubinno in nacfiyada barnaamijka la qeybiyo iyada oo aan loo eegin jinsiyadda, midabka, ama asal qarameedka.

**Arjigan waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka iyo lamaanaha da'doodu tahay 60 iyo wixii ka weyn.** Haddii ay jiraan dad kale oo da'doodu ka yar tahay 60 jir oo codsanaya, fadlan isticmaal "Combined Application Form" ("Foomka Arjiga Isku dhafka ah") (DHS-5223). Waxa kale oo aad ka dalban kartaa khadka internetka MNbenefits.mn.gov.

<b>QOFKA 1-AAD</b>		
MAGACA SHARCIGA EE CODSADAAHA - MAGACA DAMBE	MAGACA KOOWAAD	MAGACA DHEXE
MAGACYADA KALE AAD ISTICMAASHO (magaca awoowe, naaneysta, iwm.)		LAMBARKA SUGNAANTA BULSHADA
TAARIKHDA DHALASHADA	JINSIGA <input type="radio"/> Lab <input type="radio"/> Dhedig	XAALADDA GUURKA* <input type="radio"/> N <input type="radio"/> M <input type="radio"/> S <input type="radio"/> L <input type="radio"/> D <input type="radio"/> W
CINWAANKA AAD KU NOOSHAY (haddii aad qabin cinwaan, qor "guri la'aan")		LAM. DUDDADA
MAGAALADA	GOBOLKA	ASTAANTA BOOSTADA
CINWAANKA BOOSTADA (haddii uu ka duwan yahay cinwaanka aad ku nooshahay)		LAM. DUDDADA
MAGAALADA	GOBOLKA	ASTAANTA BOOSTADA
LAMBARKA TELEFOONKA GURIGA	LAMBARKA TELEFOONKA EE KALE	Ma waxaad ku nooshahay seero? <input type="radio"/> Maya <input type="radio"/> Haa - midkee?
Ma u baahantahay tarjubaan? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya		Waa maxay luqadda aad door-bideysid in aad ku hadashid?
Waa maxay luqadda aad door-bideysid qoraal ahaan?		FASALKA DUGSIGA UGU DAMBEEYAY EE LA DHAMEYSTIRAY
FASALKA DUGSIGA UGU DAMBEEYAY EE LA DHAMEYSTIRAY		
Taariikhda: _____ Laga Bilaabo: _____		
WADANIYADDA		
<input type="radio"/> Muwaadin Maraykan ah ama dhalasho Maraykan ah haysta <input type="radio"/> Muwaadin Maraykan la wadaniyeeyay ama Muwaadinimo Maraykan kasban karo <input type="radio"/> Aan ahayn muwaadin Maraykan ah		
XAALADA SOCDAALKA	QOWMIYADA (ikhtiyaar) Hisbaanik? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	SINSIGA** (ikhtiyaar) <input type="checkbox"/> A <input type="checkbox"/> B <input type="checkbox"/> N <input type="checkbox"/> P <input type="checkbox"/> W
Miyuu jiraa qof qoyskaaga ka tirsan oo helay gargaar lacageed, badeecooyin, ama dheefaha SNAP hadda kahor? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Hadday haa tahay, goorma? _____ Xagee? _____ Maxay? _____		

**Miyaad u baahan tahay caawimaad Isla markiiba? Su'aalaha 1-4aad** waxay naga caawin doonaan inaan go'aan ka gaarno haddii aad caawinaad cunto heli karto isla markiiba.

1. Intee in le'eg oo dhakhli ah ayaa soo galay ama soo geli doona qoyskaaga **Bishaan?** \$ \_\_\_\_\_

1a. Miyaad iskaa u shaqeysataa?  Haa  Maya

2. Immisa ayay qoyskaagu (oo ay ku jiraan carruurta) u haystaan **lacag caddaan ah, jeeg ahaan ama keyd?** \$ \_\_\_\_\_


3. Immisa ayuu qoyskaaga bixiyaa **kiro/rahan bil kasta?** \$ \_\_\_\_\_

3a. **Adeegyadee** bixisaa?  Kululeynta  Hawo qaboojiyaha  Korontada  Taleefoonka  Midna

3b. Ma heshaa kaalmada tamarta/korontada?  Haa  Maya

4. Ma jiraa qof qoyskaaga ka tirsan oo ah **soogalooti ama shaqaale beereed xilli-sanadeed?**  Haa  Maya

**Waan eegay dhamman jawaabaheyga waxaana aaminsanahay inay dhammaan yihiin kuwo run ah oo sax ah inta aan ogahay.**

SAXIIXA CODSADAHA AMA WAKIILKA RASMIGA 	TAARIIKHDA	SAXIIXA HAY'ADDA	TAARIIKHDA LA HELAY
---	------------	------------------	---------------------

**\*Xaaladda guur (mid dooro)**

**N** = Waligay ma guursan **M** = Guusaday lana nool lamaanahayga **S** = Kala maqan (guursaday, kala nool) **L** = Si sharci ah u kala tagay  
**D** = La furay/furay **W** = Carmal ah

**\*\*Sinji (tax dhammaan kuwa khuseeya)**

**A** = Aasiyaan **B** = Madow ama Afrikaanka Maraykan **N** = Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska  
**P** = Jaziirada Baasifiga ama Dhaladka Hawaay **W** = Cadaan

**Waa sidee xaaladdaada nololeed? (qasab maaha)**

Ku nool guri aan leeyahay; ijaar, deyn ama saaxiib la nool

Hoyga degdega ah

Isbitaal, xarun daawayn, xarunta sun-saaridda ama guriga kalkaalinta

Meel aan loogu talagalin guriyeyn (meel dibedda ah, baabuur, dhismo laga guuray, ama bas/tareen/diyaarad)

Qoyska/saaxiibada dhaqaale xumo awgeed

Bixiyo adeeg - daryeelka koriinka, guri kooxeed

Jeel, xabsi ama xarun maxkamad-suge

Hudheel ama moodheel

Sabab kale: \_\_\_\_\_

**Macluumaadka ku saabsan qoraallada iyo iimayllada**

Waxda Adeegyada Aadanaha waxay kugu martiqaadaysaa inaad hesho isgaarsiin eletroonig ah ee khuseysa dheefooyinkaaga iyo khayraadka aad heli karto. Markaad doorato haa, waxaad ogolaatay inaad hesho isgaarsiin elektaroonig ah waxaadna ogolaatay shuruudaha iyo xeerarka DHS iyo siyaasada khaaska ah. Fariinta iyo qiimayaasha xogta ayaa la adeegsan karaa. Inta jeer ee fariinta la soo diro way kala duwan tahay. Shuruudaha iyo xeerarka ka eeg barta <https://mn.gov/dhs/text-economic-assistance>. Siyaasada asturnaanta ka eeg barta <https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3979-ENG>.

Ma saxbaa in lagugula soo xiriiro qoraal ahaan?

Maya  Haa – nambarkii ayaa heli kara qoraallada? \_\_\_\_\_

Ma saxbaa in lagugula soo xiriiro iimayl ahaan?

Maya  Haa – cinwaanka limeylka: \_\_\_\_\_

AGENCY USE: MEMB, MEMI, TYPE, PROG, IMIG, SPON			
Eligible for expedited SNAP?	<input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No		Intends to reside in MN? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No
Same-day interview offered?	<input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No	Declined? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No	Does person have sponsor? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No
Next-day interview offered?	<input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No	Declined? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No	Verification: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached
_____ children	_____ adults		

## Dad dheeraad ah

Tax dhammaan dadka ku nool gurigaaga xitaa haddii aadan iyaga u codsanayn iyo/ama qofku aanu codsanayn caawimo. Xeerarka barnaamijku waxay u baahan yihiin dadka qaarkood inay dheefaha wada helaan. Waa inaad bixisaa lambarka Sugnaanta Bulshada ee **kaliya** dadka codsanaya caawimaadda. Haddii qof ka mid ah qoyska uu isticmaalo magac kale (magaca hooyada, naanays, iwm.) ku tax magacyada kale sanduuqyada MAGACYADA KALE ee hoose. **U tax sidaan:** Lamaanahaaga, dadka kale ee waaweyn, carruurta, dhammaan dadka kale, qof kasta oo si ku meel gaar ah guriga uga maqan. Su'aalaha QOWMIYADAHA iyo SINJIGA waa ikhtiyaari mana saameynayaan u-qalmiitaankaaga ama heerka dheefaha. Sababta aan u waydiisanno macluumaadkan waa in aan hubinno in dheefaha barnaamijka la qaybiyo iyada oo aan loo eegin sinjiga, midabka, ama asalka qaran.

<b>Qofka 2</b>			
MAGACA SHARCIGA - MAGACA DAMBE	MAGACA KOOWAAD	MAGACA DHEXE	
MAGACYADA KALE	LAMBARKA SUGNAANTA BULSHADA	TAARIKHDA DHALASHADA	JINSIGA <input type="radio"/> Lab <input type="radio"/> Dhedig
XIRIIRKA KAALA DHAXEYO	XAALADDA GUURKA* <input type="radio"/> N <input type="radio"/> M <input type="radio"/> S <input type="radio"/> L <input type="radio"/> D <input type="radio"/> W	FASALKA DUGSIGA UGU DAMBEEYAY EE LA DHAMEYSTIRAY	
MARKI UGU DAMBAYSAY U SOO GUURAY MINNESOTA			
Taariikhda (mm/dd/yyyy): _____ Laga Bilaabo _____			
WADANIYADDA			
<input type="radio"/> Muwaadin Maraykan ah ama dhalasho Maraykan ah haysta <input type="radio"/> Muwaadin Maraykan la wadaniyeeyay ama Muwaadinimo Maraykan kasban karo <input type="radio"/> Aan ahayn muwaadin Maraykan ah			
XAALADA SOCDAAALKA	WAA MAXAY BARNAMIJ-KA(YADA) UU QOFKAN CODSANAYA?		
	<input type="checkbox"/> SNAP (cunto) <input type="checkbox"/> Waxba		
JINSIYADDA (ikhtiyaari)		ASALKA (ikhtiyaari)	
Isbaanish? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya		<input type="checkbox"/> A <input type="checkbox"/> B <input type="checkbox"/> N <input type="checkbox"/> P <input type="checkbox"/> W	
<b>AGENCY USE: MEMB, MEMI, TYPE, PROG, IMIG, SPON</b>			
Intends to reside in MN? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No		RELATIONSHIP VERIFICATION	IMMIGRATION VERIFICATION
Does person have sponsor? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No		<input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached	<input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached

<b>Qofka 3</b>			
MAGACA SHARCIGA - MAGACA DAMBE		MAGACA KOOWAAD	
MAGACYADA KALE		LAMBARKA SUGNAANTA BULSHADA	TAARIKHDA DHALASHADA
XIRIIRKA KAALA DHAXEYO		XAALADDA GUURKA* <input type="radio"/> N <input type="radio"/> M <input type="radio"/> S <input type="radio"/> L <input type="radio"/> D <input type="radio"/> W	JINSIGA <input type="radio"/> Lab <input type="radio"/> Dhedig
MARKI UGU DAMBAYSAY U SOO GUURAY MINNESOTA		FASALKA DUGSIGA UGU DAMBEEYAY EE LA DHAMEYSTIRAY	
Taariikhda (mm/dd/yyyy): _____ Laga Bilaabo _____			
WADANIYADDA <input type="radio"/> Muwaadin Maraykan ah ama dhalasho Maraykan ah haysta <input type="radio"/> Muwaadin Maraykan la wadaniyeeyay ama Muwaadinimo Maraykan kasban karo <input type="radio"/> Aan ahayn muwaadin Maraykan ah			
XAALADA SOCDAALKA		WAA MAXAY BARNAAMIJ-KA(YADA) UU QOFKAN CODSANAYA? <input type="checkbox"/> SNAP (cunto) <input type="checkbox"/> Waxba	
JINSIYADDA (ikhtiyaari) Isbaanish? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya		ASALKA (ikhtiyaari) <input type="checkbox"/> A <input type="checkbox"/> B <input type="checkbox"/> N <input type="checkbox"/> P <input type="checkbox"/> W	
<b>AGENCY USE: MEMB, MEMI, TYPE, PROG, IMIG, SPON</b>			
Intends to reside in MN? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No		RELATIONSHIP VERIFICATION <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached	IMMIGRATION VERIFICATION <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached
Does person have sponsor? <input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No			

**Haddii aad ka badantihiin 3 qof, buuxi DHS-5223S ama ku soo lifaaq xaashi gooni ah.**

1. Miyuu jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo haysta shaqo ama filaya inuu dakhli ka helo shaqo bishan ama bisha xigta? **Keen ama soo dir caddayn**  
 Haa  Maya

Haddii ay haa tahay:

MAGACA LOO-SHAQEYAHAA	
MUSHAARKA SAACADII	INTEE SAACADOOD AYAAD SHAQAYSAA TODDOBAADKII
MAGACA LOO-SHAQEYAHAA/GANACSIGA	
MAGACA LOO-SHAQEYAHAA	
MUSHAARKA SAACADII	INTEE SAACADOOD AYAAD SHAQAYSAA TODDOBAADKII
MAGACA LOO-SHAQEYAHAA/GANACSIGA	

<b>AGENCY USE: JOBS, STIN, SPON</b>
<input type="checkbox"/> Confirmed response
VERIFICATION: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached
HOW OFTEN PAID: <input type="checkbox"/> Daily <input type="checkbox"/> Weekly <input type="checkbox"/> Biweekly <input type="checkbox"/> Semi-monthly <input type="checkbox"/> Other

**Ogow:** Ku dar dakhliga ka soo gala Shaqada-galinka ee xilliga waxbarashada iyo carbinnada mushaareed. Ku dar dheefaha bilaashka ah ama kharashyada shaqada ee la dhimay (hoyga, cuntada, dharka, iwm.).



2. Ma jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo iskii u shaqeysta ama ma jiraa qof filaya inuu dakhli ka helo iskaa u shaqeysiga bishaan ama bisha xigta? **Keen ama soo dir caddayn**

Haa  Maya

Haddii ay haa tahay:

DAKHLIGA GUUD EE BISHII

**AGENCY USE: BUSI, RBIC, SPON**

Confirmed response

50%  taxable

VERIFICATION:  requested  attached

Tusaalooyin:

• libinta badeeco

• Wargeys geynta

• Darawalnimada

• Barnaamijka Kaydinta Ilaalinta (CRP)

• Daryeelka maalintii ee guriga dhexdiisa

• Adeegyada gaarsiinta

• Shaqsiyeed

• Hoy-wadaage

• Kale

• Beerasho

• Guri kirayn

3. Ma jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo codsaday ama qof helo mid ka mid ah noocyada soo socda ee dakhliga? **Keen ama soo dir caddayn. \*\*Wakaaladu waxay kaa xaqiijin doontaa dakhligan.**

**AGENCY USE: PBEN, UNEA, SPON**

Confirmed response

VERIFICATION:  requested  attached

Sugnaanta Bulshada (RSDI)**	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Dakhliga Kaabidda ah ee Sugnaanta (SSI)**	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Dheefaha Halyeyga (VA)	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Caymiska Shaqa la'aanta	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Magdhawga Shaqaalaha	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Dheefaha hawlgabka	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Lacag-bixinnada qabiilka	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Masruufka ilmaha ama masruufka lamaanaha	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?
Dakhliga kale ee aan la kasban (hanti, hadiyadaha, khamaarka, iwm.)	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya	\$	Inta jeer?

4. **Qoyskaagu** ma leeyahay kharashyada guri ee soo socda? Ku calaamadee haa ama maya shay kasta. **Keen ama soo dir caddayn.**

Kiro (waxaa ku jira kirada qeyb ka mid ah guriga guurguura)	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Amaahda-guri/heshiiska qeyb-qeyb u bixinta qiimaha guriga	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Kharashyada maamulka guriga	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Caymiska mulkiilaha guriga (haddii aan lagu darin amaahda guryaha)	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Hoy iyo/ama cunno	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Canshuuraha guryaha (haddii aan lagu darin amaahda guryaha)	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya

**AGENCY USE: SHEL, EATS**

Confirmed response

VERIFICATION:  requested  attached

4a. Ma heshaa kaalmo kiro (tusaale: Qaybta 8)?  Haa  Maya

5. Miyuu **qoyskaagu** leeyahay kharashyada adeega ee soo socda **wakhti un** sanadka dhexdiisa ah, **oo ay ku jiraan kharashyada xilliyeed?** Ku calaamadee haa ama maya shay kasta.. **Keen ama soo dir caddayn.**

Kululaynta	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Biyaha iyo bulaacada	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Taleefan guriga/taleefanka gacanta	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Hawo qaboojiyaha	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Korontada	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya
Qashin qaadidda	<input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya

<b>AGENCY USE: ACUT, HEST</b>
<input type="checkbox"/> Confirmed response
VERIFICATION: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached

- 5a. Adiga ama qof ka mid ah qoyskaaga ma helay gargaar tamareed/koronto oo ka badan \$20, 12 bilood ee la soo dhaafay?

Haa  Maya

6. **Adiga ama qof un kula nool** kharash ma u haystaa daryeelka qof weyn oo **buka ama naafo** ah maadaama adiga ama iyaga ay shaqaynayaan, shaqo raadis yihiin ama dugsi dhigtaan?

Haa  Maya

<b>AGENCY USE: DCEX</b>
<input type="checkbox"/> Confirmed response
VERIFICATION: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached

7. Ma jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo **bixiya** masruuf ilmo oo ay maxkamadu amartay, masruufka lamaane, masruufka daryeelka ilmaha, taageerada caafimaadka ama wax ku biiriya ku tiirsanaanta cashuurta ee aan ku noolayn gurigaaga?

Haa  Maya

<b>AGENCY USE: COEX</b>
<input type="checkbox"/> Confirmed response
VERIFICATION: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached

8. **Loogu talagalay SNAP kaliya:** Ma jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo lagu leeyahay kharashyo caafimaad? Si aad u hesho dhimis caafimaad waa inaad keentaa caddaynta dhammaan biilasha caafimaadka ee uu bixiyay qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan **oo naafo ah ama 60 jir ah ama ka weyn.**

**Ha la** iman biilasha caafimaadka ee ay bixinayaan barnaamij kasta oo daryeel caafimaad, caymis ama qof aan kula noolayn.

Haa  Maya

<b>AGENCY USE: FMED</b>
<input type="checkbox"/> Confirmed response
VERIFICATION: <input type="radio"/> requested <input type="radio"/> attached

9. Maxkamad ama maamul kale oo madani ama nidaam maamul oo ku yalla Minnesota ama gobol kale ma ku helay qof qoyska ka mid ah dembi ama qofna ma loo diiday inuu helo kaalmada dadweynaha maadaama oo uu jebiyey mid ka mid ah digniinaha ciqaabta SNAP ee yaalla bogga 2 ee tilmaamaha?

Haa  Maya

10. Ma jiraa **qof** qoyska ka tirsan oo lagu xukumay inuu sameeyay bayaanno been-abuur ah oo ku saabsan meesha uu deggan yahay si ay dheefaha SNAP uga helaan in ka badan hal gobol?

Haa  Maya

11. Ma jiraa **qof** qoyskaaga ka tirsan oo ka dhummanayo ama ka cararaya sharciga si uu uga fogaado in dacwad lagu soo oogo, xabsiga loo taxaabo, ama si uu uga fogaado in xabsiga loo galiyo dembi culus?

Haa  Maya

12. Ma jiraa **qof** qoyskaaga ka tirsan oo lagu xukumay dambi culus oo daroogo ah 10kii sano ee tagay?

Haa  Maya

13. Ma jiraa **qof** qoyskaaga ka tirsan oo ku xad gudbaya shuruudda sii-daynta sharafeed, tijaabinta maxkameed, ama sii-dayn la kormeerayo?

Haa  Maya

**Waxaad u oggolaan kartaa qof (dad) kale inuu/inay:**

- Buuxiyo foomamka oo ka codsado wakaaladda caawimaad
- La xiriiraan wakaaladda
- Helaan ogeysiisyo iyo macluumaadka la xiriira kiiskaaga
- Helaan dheefahaaga SNAP oo cunto kuu soo iibiyaan iyadoo adeegsanayo akoonkaaga Wareejinta Dheefaha Elektarooniga ah (EBT).

Waxaad waydiisan kartaa in ka badan hal qof inuu kaa caawiyo shayyada kor ku xusan. Qofka (dadka) la oggolaaday waxay noqon karaan saaxiib, qaraabo, xirfadle lagu kalsoon yahay oo ku matalayo, qof ay maxkamaddu oggolaatay, ama qof haysta awoodda qareenka. Qofkan(dadka) way ku matali karaan ilaa aad ogaysiiso shaqaalahaaga in aad rabto in tani dhamaato. Weydii shaqaalahaaga macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakiilada idman. **Dhammaan dadka idman waa inay saxiixaan oo taariikheeyaan bogga ugu dambeeya ee codsigan.**





QOFKA 1-AAD EE LA OGGALAADAY			
WAXAAN DOONAYAA QOFKA MAGACAABAN INUU: <input type="checkbox"/> Buuxi foomamka <input type="checkbox"/> Hel xusuusino <input type="checkbox"/> Hel oo isticmaal nacfigayga SNAP nacfiyada <input type="checkbox"/> La xidhiidh	MAGACA	XIRIIRKA KAALA DHAXEEO	LAMBARKA TELEFOONKA
	CIWAANKA		
	MAGAALADA	GOBOLKA	ASTAANTA BOOSTADA

QOFKA 2-AAD EE LA OGGALAADAY			
WAXAAN DOONAYAA QOFKA MAGACAABAN INUU: <input type="checkbox"/> Buuxi foomamka <input type="checkbox"/> Hel xusuusino <input type="checkbox"/> Hel oo isticmaal nacfigayga SNAP nacfiyada <input type="checkbox"/> La xidhiidh	MAGACA	XIRIIRKA KAALA DHAXEEO	LAMBARKA TELEFOONKA
	CIWAANKA		
	MAGAALADA	GOBOLKA	ASTAANTA BOOSTADA

\*Kaliya hal wakiil oo idman ayaa heli kara oo isticmaali kara dheefaha SNAP isagoo matalaya codsadaha.

**Adigoo saxiixaya:**

Waxaan ku caddaynayaa ganaaxa been-abuurka hoos imaanayo aan ku eegay codsigan iyo inta aan ogahay inuu yahay bayaan sax ah xogta qodob kasta. Waxaan fahamsanahay in qofka lagu helo beenta sheegid lagu ciqaabi karo xabsi aan ka badneyn illaa shan sano ama bixinta ganaax lacageed aan ka badneyn illaa \$10,000, ama labadaba. [Xeerka Minnesota, qaybta 256.984, farqada 1]

SAXIIXA CODSADAHA AMA WAKIILKA RASMIGA 	TAARIKHDA	SAXIIXA XAASKA AMA QAANGAARKA KALE 	TAARIKHDA
SAXIIXA WAKIILKA RASMIGA 	TAARIKHDA	SAXIIXA WAKIILKA RASMIGA 	TAARIKHDA

**AGENCY USE**

PROVIDED APPLICANT WITH THE FOLLOWING DOCUMENTS:

- |  |   |
|--|---|
| <input type="checkbox"/> Program information for cash, food and child care programs (DHS-2920) | <input type="checkbox"/> Notice About Income and Eligibility Verification System and Work Reporting System (DHS-2759) <i>(attached)</i> |
| <input type="checkbox"/> Domestic Violence Information brochure (DHS-3477)                     | <input type="checkbox"/> Do you have a disability? (DHS-4133)   |
| <input type="checkbox"/> Notice of Privacy Practices (DHS-3979) <i>(attached)</i>              | <input type="checkbox"/> How to Use Your Minnesota EBT Card (DHS-3315A)   |
| <input type="checkbox"/> Client responsibilities and rights (DHS-4163) <i>(attached)</i>       | <input type="checkbox"/> Reviewed all pages of application with client  |
| <input type="checkbox"/> Appeal Rights (DHS-3353) <i>(attached)</i>                            |   |

AGENCY SIGNATURE

INTERVIEW DATE

CASE NUMBER

**Warbixin dheeraad ah**